Hudson Hospital & Clinic
HealthPartners®

XEERKA CAAWINTA DHAQAALAHA - #837

Isbitaalka Hudson (“Hudson”) waxa uu ballan qaadayaa bixinta adeeg caafimaad oo tayeysan oo loogu talogaley bukaanadeena, kuwaasoo ay ku jiraan dadka u baahan caawinta dhaqaalaha. Sidaa darteed, Xeerkeena Caawinta Dhaqaaluhu (kaasoo halkan loosoo gaabinayo “FAP” ama “Xeerka’) waxaa loogu talogaley bukaanada aan ku jirin ama kuwa ku jira ceymiska taasoo ku saleysan kartida bukaanada ee la xiriirta bixinta daryeelka degdegga ah iyo daryeelada caafimaadka kale ee lagama maaremaanka ah. Xeerkeena waxaa loogu talogaley taageero goos-goos ah; maaha mid looga gol leeyahay muddo dheer, mid lacag la’aan ah ama daryeel qiime dhimis ah. Xeerkeena waxaa ku qeexan shuruudaha u degsan u qalmitaanka, qaabka aan isku celcelinta qiime dhimista, qaabka loo dalbanayo caawinta dhaqaalaha, bixiyayaasha adeegga daryeelka ee Isbitaalkeena, iyo xeerkeena daryeelka caafimaadka deg-degga ah.

Bukaanadu waxay heli karaan nuqulo koobi oo lacag la’aan ah kuwaasoo ku saabsan Xeerkan iyo foomka lagu dalbanayo caawinta dhaqaalaha ee uu qofku si shakhsi ah uga dalban karo dhamaan goobaha diiwaangelinta bukaanada. Wixii macluumaad dheeraad ah ama su’aalo ee ku saabsan habka loo marayo codsiyada, ama dalbashada nuqulada koobiyada iyadoo la adeegsanayo nidaamka emailka bukaanadu waxay la xiriiri karaan Waaxda Adeegyada Caawinta Dhaqaalaha Bukaanada iyagoo adeegsanaya teleefonka 715-531-6200, ama ciwaanka 405 Stageline Rd. Hudson, WI 54016. Wixii nuqulo lacag la’aan ah ee ku saabsan xeerkan, foomka codsiga, iyo hawlaha tarjumitaanka waxaa laga heli karaa barta internetka ee ciwaankeedu yahay www.hudsonhospital.org

HURUUDAHA U QALANKA

Isbitaalka Hudson wuxuu sameeyey shuruudaha u qalmitaanka ee hoos ku qoran ee bukaanada loogu talogaley inay helaan adeeg caafimaad deg-deg ah oo lacag la’aan ah ama mid qiimahiisa la dhimay ama adeeg kale oo caafimaad kaasoo lagama maarmaan ah:

1. Bukaanku waa inuu soo gudbiyo caddeyn muujineysa aqbalitaanka ama diidmada faa’iidooyinka ay xukuumaddu bixiso, sida Kaalmada Caafimaadka ee loogu talogaley bukaanka ama xubnaha qoyskooda kuwaasoo laga helo koowntiyada ama barnaamijyada lagu magacaabo Medicaid ee ay xukuumaddu bixiso.

2. Bukaanku waa inuu yahay mid kasoo quustay dhamaan kaalmooyinka ay dawladdu bixiso iyo wax alla wixii faa’iido ah ee la xiriirta ceymiska caafimaadka.

3. Bukaanku waa inuu soo buuxiyo Codsiga Kaalmada Dhaqaalaha Isbitaalka kadibna uu kusoo lifaaqo dhamaan dukumintiyada loo baahan yahay.

4. Isbitaalku wuxuu kaalmo siinayaa dhamaan bukaanada u qalma.

    A. U qalmitaanka bukaanka ee la xiriira daryeel lacag la’aan ah ama mid qiime dhimis ah waxaa lagu saleyn doonaa dakhliga qoyska iyo tirada xubnaha qoyska.

    B. Isbitaalku wuxuu kaalmo siinayaa bukaanada uu dakhliga qoyskoodu ka yar yahay ama u dhigmo 300% Heerka Faqrinimada Federaaliga (Federal Poverty Level, FPL), iyadoo heerka qiime dhimistu ku saleysnaan doonto tirada xubnaha qoyska iyo dakhliga qoyska bukaanka iyadoo lagu jaangoynayo Heerka Faqrinimada Federaaliga FPL.

C. Bukaanada uu dakhligooda ama tirada xubnaha qoyskoodu ay gaarsiisan tahay ama ay ka hooseyso 200% Heerka Faqrinimada Federaaliga FPL waxay heli doonaan qiime dhimis dhan 100%. Bukaanada dakhligooda iyo tirada xubnaha qoyskoodu ay ka sarreyso 200% Heerka Faqrinimada Federaaliga FPL hase ahaatee ayna ka sarreynin 300% Heerka Faqrinimada Federaaliga FPL waxay heli doonaan qiime dhimis isbed-beddali karta taasoo lagu saleyn doono shaxda hoose ee Qiime Dhimista Kaalmada Dhaqaalaha. (Wixii macluumaad dheeraad ah booqo barta internetka ee ciwaankeedu yahay: https://aspe.hhs.gov/poverty-guidelines)

Shaxda Qiime Dhimista Kaalmada Dhaqaalaha

Tirada	Qiime dhimis	Dakhliga Guud ee	Qiime
1	FPL x 300%	$37,470	52.3%
	FPL x 250%	$31,225	75%
	FPL x 200%	$24,980	100%
	FPL x 100%	$12,490	100%
2	FPL x 300%	$50,730	52.3%
	FPL x 250%	$42,275	75%
	FPL x 200%	$33,820	100%
	FPL x 100%	$16,910	100%
3	FPL x 300%	$63,990	52.3%
	FPL x 250%	$53,325	75%
	FPL x 200%	$42,660	100%
	FPL x 100%	$21,330	100%
4	FPL x 300%	$77,250	52.3%
	FPL x 250%	$64,375	75%
	FPL x 200%	$51,500	100%
	FPL x 100%	$25,750	100%
5	FPL x 300%	$90,510	52.3%
	FPL x 250%	$75,425	75%
	FPL x 200%	$60,340	100%
	FPL x 100%	$30,170	100%
6	FPL x 300%	$103,770	52.3%
	FPL x 250%	$86,475	75%
	FPL x 200%	$69,180	100%
	FPL x 100%	$34,590	100%
7	FPL x 300%	$117,030	52.3%
	FPL x 250%	$97,525	75%
	FPL x 200%	$78,020	100%
	FPL x 100%	$39,010	100%
8	FPL x 300%	$130,290	52.3%
	FPL x 250%	$108,575	75%
	FPL x 200%	$86,860	100%
	FPL x 100%	$43,430	100%

* Qof kasta oo dheeraad ah waxaa lagu kordhinayaa lacag dhan $4,420

Hudson Hospital & Clinic
HealthPartners®

SIDA LOO CODSADO GARGAAR DHAQAALE

1. Bukaanada waxaa looga baahan yahay inay buuxiyaan Codsiga Kaalmada Dhaqaalaha, isla mar ahaantaana ay shakhsi ahaan usoo gudbiyaan ama boostada kusoo diraan caddeymaha xaqiijinta ee la xiriira dakhliga iyo wixii dukuminti ee taageeraya iyagoo kusoo hagaajinaya ciwaanka hoos ku qoran: Hudson Hospital, Patient Financial Services, 405 Stageline Rd., Hudson WI , 54016.

2. Bukaannada ayaa sidoo kale ugu diri kara faakis codsiyada dhammayskatiran iyo caddaynta(maha) habboon iyo dukuminti kasta ee taageeraya daqliga Adeegyada Gargaarka Dhaqaalaha wac lambarka 715-531-6201.

3. Caddeymaha xaqiijinta dakhliga waxaa ka mid ah nuqul koobi ah oo ka mid ah foomkii ugu danbeeyey ee uu bukaanku ku celiyey canshruurta federaalka kaasoo loo yaqaan Federal 1040 oo ay la socdaan dhamaan jadwalada iyo/ama warqadda faa'iidada Social Security, warqadda faa'iidada shaqo la'aanta ama faa'iidada curyaanimada.

4. Codsiga waxaa laga daabacan karaa barteena internetka ee ciwaankeedu yahay www.hudsonhospital.org ama waxay bukaanadu ka heli karaan nuqul koobi ah Waaxda Adeegyada Kaalmada Dhaqaalaha iyagoo kala xiriiraya 715-531-6200.

5. Waxaa la heli karaa Shaqaalaha Isbitaalka ee qaabbilsan Adeegyada Kaalmada Dhaqaalaha ee Bukaanka si bukaanada u caawiyaan iyagoo adeegsanaya khadka telefoonka ama si shakhsi ah si uu qofku u buuxiyo codsiga. Sidoo kale bukaanadu waxay la xiriiri karaan Waaxda Adeegyada Shaqaalaha ee koowntiga ay deggan yihiin.

6. Bukaanadu waxay la xiriiri karaan Adeegyada DhaqaalahaBukaanka iyagoo adeegsanayana lambarka 715-531-6200 si ay u weydiiyaan wixii su'aalo ah ee la xiriira codsiyadooda iyo in la isuigu duba rido /loo qabto ballan ay la yeeshaan wakiilkooda.

XISAABINTA GARGAARKA DHAQAALE

Isbitaalka Hudson wuxuu xisaabinayaa kaalmada dhaqaalaha ee loogu talogaley bukaanka isagoo adeegsanaya qaababka hoos ku qoran:

1. Bukaanka uqalma wixii gargaar dhaqaale Isbitaalka laguma soo dallici doono in ka badan xaddiyada guud ee biilasha loogu talogaley bukaannada ku jira ceymiska isbitaalka ee daryeelka deg-degga ah iyo daryeelada kale ee caafimaadka ee lagama maarmaanka ah. Haatan, Isbitaalku wuxuu go'aaminayaa xaddiyada guud ee biilasha iyada oo lagu dhufto kharashka laga qaado daryeelka caafimaadka deg-degga ah ama daryeelada caafimaad ee kale kuwaasoo lagama maarmaan ah kuwaasoo la siiyo bukaanada u qalma inay helaan kaalmada dhaqaalaha ee lagu saleeyey xaddiga guud ee biilasha ee gaarsiisan 47.7%.

Hudson Hospital & Clinic
HealthPartners

Isbitaalka ayaa ku xisaabiyay boqollaydan iyaga oo u qaybiyay isku geynta dhammaan sheegashooyinka daryeelka caafimaad ahaan loo baahan yahay ee ay oggol yihiin caymis bixiyeyaasha caafimaad muddadii 12kii bilood ee lasoo dhaafay oo loo qaybiyo isku geynta guud ee kharashka lasoo dallacay ee loo baahan yahay inuu qofku bixiyo.

Go'aaminta Xaq ulahaanshaha ku saleysan mala awaalka

Waxaa dhici karta in Isbitaalka Hudson uu u qaato inuu bukaanku u qalmo helitaanka kaalmo dhaqaaledhaqaale taasoo lagu saleeyey go'aan qaadasho hore oo la xiriirta u qalmitaanka ama soo buuxinta shuruudo gaar ah oo la xiriira kaalmada dhaqaalaha, kuwaasoo ay ku jiraan hase ahaatee aan ku koobnayn arrimaha hoos ku qoran:

- Guri-la'aanta
- Adeegyada Caafimaad ahaan lagama maarmaanka ah ee aan ku jirin ceymiska barnaamijka Medicaid ama deeqda ay bixiyaan federaalku ee la siiyo qofka u qalma
- Shuruudaha uqalmitaanka iyo taariikhda ay billaabaneyso barnaamijka Medicaid waxay ku xigaan taariikhaha la bixinayo adeegyada
- Xabsi
- Milatari- duruufo gaar ahaaneed

Haddii bukaanka laga qaato go'aan mala awaal ah oo la xiriira inuu u qalmo kaalmada dhaqaale ee ka hooseysa heerka ugu badan, Isbitaalku wuxuu bukaanka ku wargelin doonaa bukaanka qoddobka loo cuskaday go'aanka laga qaatay, qaabka loo dhaqangelinayo kaalmada ugu badan, waxaana bukaanka la siin doonaa waqti macquul ah oo uu kusoo codsado kaalmo dheeraad ah, iyo in la qaato go'aan kadib marka uu qofku soo gudbiyo codsiga uu ku dalbanayo kaalmada dheeraadka ah.

LIISKA ISBITAALKA EE BIXIYAYAASHA ADEEGGA

Isbitaalka Hudson wuxuu u baahan yahay inuu liis ahaan u qoro dhamaan bixiyayaasha adeegga ee aan ka ahayn isla Isbitaalka Hudson, kuwaasoo bixinaya adeegyada caafimaadka deg-degga, ama adeegyada caafimaadka kale ee lagama maarmaanka ah iyo inuu Isbitaalku si gaar ah u qeexo kuwa ay yihiin bixiyayaasha adeegga ee uu Xeerku qeexayo iyo kuwa aan ku jirin. Liiska bixiyayaasha waxaa laga heli karaa dukuminti kale oo gaar ah. Bukaanadu waxay booqan karaan barteena internetka ee ciwaankeedu yahay www.hudsonhospital.org si ay u akhristaan dukumintiga ama waxay la xiriiri karaan Adeegyada Kaalmada Bukaanka iyagoo adeegsanaya lambarka 715-531-6200 iyagoo ka dalbanaya warqad koobi ah.

Hudson Hospital & Clinic
HealthPartners®

XEERKA DARYEELKA CAAFIMAADKA DEG-DEGGA

Isbitaalka Hudson wuxuu bixiyaa adeeg caafimaad oo loogu talogaley xaaladaha deg-degga ah iyadoo aan bukaanada loo kala soocaynin kartida ay u leeyihiin bixinta kharashka ama u qalmitaanka kaalmada dhaqaalaha. Isbitaalku wuxuu mamnuucayaa wixii fal (falal) ah ee la xiriira ka hor istaagitaanka dalbashada bukaanada ee adeegyada caafimaadka deg-degga ah. Tusaalooyin ka mid ah dhaqanka la mamnuucay waxa ka mid ah: shaqaalaha ama wakiilka Isbitaalka oo bukaanada waaxda deg-degga kadalbada inay bixiyaan lacag kahor intayna helin daawayn loogu talagalay daryeelka caafimaadka deg-degga ah, ama u oggolaada hawlo dayn ururin kuwaasoo hakad ku keena bixinta daryeelka caafimaadka deg-degga ah.

Isbitaalka Hudson wuxuu u hoggaansami doonaa dhamaan shuruudaha loo baahan yahay ee la xiriira Xeerka Daaweynta Caafimaadka iyo Shaqaalaha (Emergency Medical Treatment and Labor Act, EMTALA), kaasoo ay ku jiraan bixinta baaritaan hore ee caafimaad, dawaynta la tacaalitaanka iyo dejinta xaaladda, iyo u wareejinta bukaanka goob kale markay ku habboon tahay. Isbitaalka Hudson wuxuu bixin doonaa dhammaan adeegyada deg-degga ah iyada oo waafaqsan shuruudaha ka-qaybgalka Xarumaha loogu talagalay Adeegyada CMS

XEERKA BIILKA GAARKA AH & URUURINTA

Tallaabooyinkani laga yaabo in Isbitaalka Hudson ku talaabsado haddii la bixin waayo wax lacag ah waxay ku qeexan yihiin Xeerka Biilka Gaarka ah & Uruurinta. Barta internetka isbitaalka Hudson ee ciwaankeedu yahay. www.hudsonhospital.org waxaa laga heli karaa nuqul bilaasha ah oo ka hadlaya Xeerka Biilka & Uruurinta